# GUDDIGA OHIO EE XUQUUQDA MADANIGA

## Xuquuqaha & Mas'uuliyadaha Guriyeynta Caddaalada ah

### Guriyeynta Caddaalada ah

Sannadkii 1965, sharciga gobolka Ohio ayaa ansixiyay mamnuucista midab-takoorka kirada, iibka guryaha iyo hawlaha kale ee la xiriira guriyeynta. Dhammaan dadka kooxaha la badbaadiyo ka tirsani waxay xaq u leeyihiin in ay ku noolaadaan goob kasta oo ay awoodaan inay ka iibsadaan guri ama ka kiraystaan guri dabaq ah (apartment).

Sharcigu wuxuu dhigayaa in ay tahay mid sharci darro ah in iibsiga guriga ama ijaarka lagu saleeyo jinsiyad, midab, jinsi, asal qaran, abtirsiinada, diinta, naafo, heerka ciidamada ama xaalada qoyska si loo sameeyo wax ka mid ah kuwan soo socda: ***Da'da kama mid aha kooxaha la badbaadiyo ee guryaha.***

- Takoorida la xariirta, xaaladaha ama mudnaanshaha iibinta ama kiraysashada.
- Diidista in la kiraysato, iibinta, laga xaajooto, maaliyadda ama caymiska guryi degenaanta.
- U muujinta qof walba in guryaha aanay iib ama kiro ahayn iyagoo diyaar u ah iib ama kiro.
- U diido inuu amaahiyo lacag loogu talagalay iibsashada, dhismaha, dayactirka, dib u habeyn ama dayactirka guryaha ama hantida la deggan yahay.
- In la qasbo, cabsi geliyo, hanjabo ama la farageliyo degenaanta ama ku raaxaysiga xuquuqda guryaha.
- In lagu sameeyo baaritaan ama la raadiyo macluumaadka ku saabsan shaqsiyaadka ka tirsan kooxaha la badbaadiyo.
- Daabacaada, soo saarida ama qaybinta warbixin kasta ama xayaysiin kasta oo tilmaamayasa xulasho ama xaddidaadda.

### Dhowritaanka Dadka Naafada ah

Haddii adiga ama qof kula xiriira leeyahay naafonimo jireed ama maskaxeed, oo ay jiraan diiwaanka naafada noocan oo kale ah ama lagu arko inaad qabto naafo noocan oo kale ah, mulkiilahaagu lagama yaabaa inuu:

Diiddo inuu ku oggolaado in aad ku sameeyso wax ka beddelka macquul ah gurigaada ama goobaha la wadaago, adigoo kharashka bixinaya, haddii ay lagama maarmaan u tahay qofka naafada ah si uu u isticmaalo guryaha, AMA

Diiddo in la sameeyo waafajinta macquulka ah ee sharciyada, siyaasadaha, dhaqanka ama adeegyada haddii lagama maarmaan ay u yihiin qofka naafada ah si uu u isticmaalo guryaha, AMA

Samaynta iyo dhisida guryo daboolan oo aan la geli karin.

**Haddii aad ka shakisan tahay in uu jiray takoorka guryaha, soo sheeg!**

U gudbi cabasho xafiiska OCRC ee xaafaddaada qofka ahaan, telefoonka ama boggeena internatka ee (www.crc.ohio.gov). Dacwadaha waa in lagu soo xereeyaa hal sano gudahood laga bilaabo taariikhda dhibku dhacay. Dhamaanba adeegyadaasi waa **lacag la'aan**.

Hadda se, ka sii samee qoraal faahfaahsan oo degdeg ah waayoaragnimadaada, oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, magaca wakiilka ama cidda guriga leh, iyo waxa aad aragtay ama waxaa lagu sheegay.

Ururi iyo meel ku haysato koobiyo xayaysiinta, waraaqaha iyo fariimaha kale ee khuseeya ee ku qoran.

### Xafiisyada Gobolka

Xafiiska Gobolka Akron
Ocasek Government Building
161 S. High St., Suite 205
Akron, OH 44308
330-643-3100
330-643-3120 (Fax)

Xafiiska Gobolka Cleveland
Lausche State Office Building
615 W. Superior Avenue
Suite 885
Cleveland, OH 44113
216-787-3150
216-787-4121 (Fax)

Xafiiska Gobolka Columbus
Rhodes State Office Tower
30 E. Broad St., 4th Floor
Columbus, OH 43215
614-466-5928
614-466-6250 (Fax)

Xafiiska Gobolka Dayton
Point West III
3055 Kettering Blvd, Suite 111
Dayton, OH 45439
937-285-6500
937-285-6606 (Fax)

Xafiiska Gobolka Toledo
One Government Center
640 Jackson St., Suite 936
Toledo, OH 43604
419-245-2900
419-245-2668 (Fax)

Xafiiska Dayax gacmeedka Cincinnati
Mid-Pointe Towers
7162 Reading Rd., Suite 1005
Cincinnati, OH 45237
513-351-2541
513-351-2616 (Fax)